

Wargeyska Mountain View

Oktoobar 19, 2016

Qamiis, Oktoobar 20.....Ma Jiro Dugsi

Jimco, Oktoobar 21.....Ma Jiro Dugsi

Isniin, Oktoobar 24.....Ma Jiro Dugsi

Isniin, Oktoobar 31.....Halloween, Ardayda Waxaa la Fasaxi Doonaa 12:40

Talaado, Nofeembar 8.....Waalidiinta iyo Macmacaanka, CLC, marka ay tahay 8:30

Fariinta Agaasimaha

Halloween waa waqti farxad leh oo loo labbisto si ka duwan ama si laga helo, macmacaan la cuno iyo waqti lala qaato qoyska iyo asxaabta. Mountain View, waxaan ka helnaa socodka labbiska ardayda. Waxaa laguugu casumay in aad fiirsatid socodka. Waxaan codsaneynaa in inta badan waalidiinta, ilaa inta suurtoogalka ah, isugu yimaadaan qolka shirarka si ay u arkaan socodka ardayda. Kaddib marka aan ka soo wadno fasaladooda, dhamaan ardayda waxay ka soo geli doonaan qolka shirarka. Marka socodka soo maro qolka shirarka, ardayda waxaa la geyn doonaa fasalada, kaddibna safka soo hara, wuxuu mari doono qolalka. Waxaan ogolnahay labbiska loo qaato socodka Halloween, hase ahaatee waxaan codsaneynaa in aysan jirin arday ama qaangaar soo qaata labbis muujiya dhiig xad dhaaf ah ama dhiig la daadiyay. Waa la ogol yahay maaskarada inta uu socdo bandhiga keliya, kaddibna waa in meel leyska dhigo, bandhigga ka hor iyo kaddib. Ugu dambayn, fadlan ha ogolaanin in ay ardayda dugsiga u soo qaataan waxyaabaha hubka u eg. Inkastoo aysan ahayn hub dhab ah, waxaan codsaneynaa in guriga lagu haysto si aysan u noqonin wax ardayda ka sii jeediya dugsiga.

Waxaan kaloo codsanaa in aan xushmeyno hiddaha iyo diimaha ay aaminsan yihiin dadka kale iyo in aan loo labbisaniin sida qof ka tirsan isir ama hiddo kale. Tusaale ahaan, waxay noqon kartaa wax dhalliya xanuun aad u badan iyo sharaf darro loo geysto asxaabtena hindida iyo qoysaska haddii aan labbisano labbiskooda hiddaha iyo/ama dhaqanka. Hiddaha labbiska Halloween waxaa badanaa loo haystaa in uu yahay sida wax lagu qoslo. Tani awgeed, qaadashada labbiska hiddaha kooxaha isirka iyo jinsiyadaha kala duwan, waxay kuwa ka soo jeeda hiddahaas u arkaan in ay tahay sharaf darro loo geysto caqiidadooda hiddaha iyo dhaqankooda aadka muhiimka u ah.

Fadlan nagu kaalmee in aan xushmeyno hiddooyinka kale, idinka oo Halloween u soo labbisaniin ama u soo labbisin caruurtiina labbiska hiddaha dadka kale. Waad ku mahadsan tahay kaalmada aad ka geysatid xaajadaan.

Waalidiinta iyo Macmacaanka

Agaasimeyaasha waxay jecel yihiin in ay kula kulmaan, kula qeybsadaan waxa ku cusub Mountain View, iyo in ay ka jawaabaan su'aalaha laga yaaho in aad qabtid. Wada hadalkena xiga ee loo qaban doono Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha waxaa lagu qaban doonaa Community

Learning Center (Xarunta Waxbarashada Bulshada) maalinta Talaadada, Oktoobar 8, marka ay tahay 8:30. Waxaan rajeyneynaa in aan halkaas kugu aragno.

Ma Jiro Dugsi Oktoobar 20-24

Ma jiro dugsi laga bilaabo Oktoobar 20 ilaa Oktoobar 24 nasashada deyrta (fall), taasoo tababareyaasha siisa fursad ay ku tagaan fasalada horumarinta aqoonta. Dugsiga wuxuu bilaaban doonaa 7:55 maalinta Talaadada, Oktoobar 25.